

Goolasha Qorshaha Waxbarashada Gaar ahaaneed

IEP Goals—Somali version

Sharciga waxbarashada dadka naafada ah (IDEA) waa sharci u yaal waddanka oo idil oo loogu tala galay waxbarashada gaar ahaaneed. Sida sharcigan hoos timaadda, marka loo garto in ilmahu naafo leeyihiin, waxey u qalmaan waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira.

Waxuu sharcigu na farayaa, haduu ilmahaagu leeyahay naafo, dad koox ah ayaa isu imaanaya si ay uga wada hadlaan waxyaabaha iyo howlaha qaaska ah ee ilmahaagu u baahan yahay. Adiga waalidka ah kooxdan ayaad ka mid tahay.

Kooxdu waxey darsaysaa warbixinnada laga bixiyey ilmahaaga. Warbixinnadan waxaa ka mid ah howlaha uu ilmahu fasalka ku qabto, warbixinnada laga helay macalimiinta, warbixinnada adiga waalidka aad ka bixisay ilmaha, iyo natiijyada laga helay imtixaanno lagu cabiray horumarka ilmaha. Waxaa kaloo ka mid ah natiijyada ka soo baxday qiimeeyn qof taqasus ah ku sameeyay ilmahaaga.

Adiga waalidka ah iyo dadka kooxda ka tirsan waxaad warbixinnadan ku ogaaneysan, sida ilmahaagu waxbarashada dugsiga ku yahay iyo waxyaabaha ay qaas ahaan ugu baahan yihiin. Tusaalo haddaan u soo qaadano in ilmahaagu dhib ku qabo akhriska, qoritaanka, dhug lahaanta, hadalka ama si wanaagsan u dhaqmeyn. Si guud ayey kooxdu u go'aansaneysaa waxyaabaha ilmahaagu u baahan yihiin in ay ku dadaalaan sanad dugsiiyeedka. Go'aankani waxaa lagu qoraa dukumeeynti loo yaqaan barnaamijka waxbarashada gaar ahaaneed Individualized Education Program (IEP).

Maxay yihiin goolasha sanadka?

Goolasha sanadka waxey qorayaan kartida ama dhaqanka la doonayo in ilmuhu ku shaqeeyo sanad dugsiiyeedka oo idil. Kuwani waa bayaan qoran oo ka mid ah barnaamijka waxbarashada gaar ahaaneed.

Goolashu waa talaabo waaweyn. Tusaalo haddaan u soo qaadano, gabadha Suzie la

yiraahdo waa lix jir, laakiin waxaa qiimeeyn lagu ogaaday in ay dhowr shay keliya magacyadooda garaneyso. Dabadeed goolka laga doonaya waxuu noqon karaa in “Suzie 60 shay magacaawdo sanadka dhamaadkii.”

Ilmaha qaarkood waxaa loo yeelaa qasdi la doonayo in ay gaaraan oo ka mid ah barnaamijkooda waxbarashada gaarahaaneed. Qasdigan waa mid talaabo yar yar ka kooban oo laga doonayo in ay sanad dugsiiyeedka dhamaadkii garaan. Tusaalo haddaan u soo qaadano gabadhii aan horey uga soo hadalnay Suzie, oo laga doonayay in ay sanadka dhamaadkii magacaawdo 60 shey. Dabadeed waxaa qasdigaan loo qeybin karaa talaabooyin yar yar sida:

1. Marka la gaaro December 31, in Suzie magacaawdo 20 shay.
2. Marka la gaaro March 15, in Suzi magacaawdo 20 kale.
3. Marka la gaaro June 15, in Suzi magacaawdo 20 kale.

Suzie markey qaaddo talaabooyinkaan oo idil, waxey gaareysaa goolkii laga doonayey in ay gaarto sanad dugsiiyeedka.

Barnaamijka waxbarashada gaar ahaaneed ee Suzie waxuu leeyahay goolal iyo heer laga doonayo in ay gaarto oo iyada u gaar ah. Waa in uu jiraa xiriir toos ah oo u dhexeeya baahida u gaarka ah ee waxbarasho ay leedahay iyo goolka lagu xusay barnaamijkeeda waxbarasho. Goolashu waa in ay ahaadaan kuwo la xiriira sida ay Suzie uga qeyb qaadan lahayd oo ay horumar la mid ah asaageed uga gaari laheyd xagga waxbarashada.

Su'aalaha in add qadariso loo baahan yahay:

Maxuu ilmaheygu u baahan yahay si uu u gaaro goolka loo qabtay? Sidey kooxdu u cabirtaa in ilmaheygu gaarayo horumar?



Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

Qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed ee ilmaha waa in uu lahaadaa warbixin tilmaameysa habka lagu cabiro horumarka sanadka ee ilmahu gaarayo. Warbixintan waxey noqon kartaa qeyb kale ee ka mid ah qorshaha qoran ama si toos ah ayaa loogu qori karaa qeybta ka hadleysa goolasha.

Sidee ku ogaanayaa in ilmaheeyga gaarayaan goolka loo qabtay?

Waa in ay jirtaa wabixin ka mid ah qorshaha oo ku saabsan sida dugsiga kuula socodsiiinayo halka gabadhaada ama wiilkaaga ka marayo waxbarashada. Warbixinnadan ka hadlaya horumarka ilmahu gaarayaan, waa in dugsigu ku siiyaa mar walba ee ardeyda kale ee caadiga ah warbixin laga dhiibo. Warbixinnadan waxey qeexayaan, horumarka uu ilmaha ka gaarayo gool walba ee loo qabtay. Iska hubi in aad si taxadir ah u darasto warbixinnadan.

Maxaan qabtaa haduu ilmaheeygu horumar ka gaareyn goolkii loo qabtay?

Hadaad tuhmeysa in ilmahaagu horumar wanaagsan ka gaareyn goolka ku xusan qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed, waxaad fali kartaa dhowr waxyaabood. Midda hore, la hadal macalinka waxbarashada gaar ahaaneed qaabilsan ama maamulaha dugsiga. Waxaa laga yabaa in aad u baahan tahay in aad isugu yeerto kulan looga wada hadlayo qorshaha waxbarasho. Qorshaha ilmahaaga mar walba ayaa dib loogu noqon karaa oo wax laga bedeli karaa. Kooxda qorshaha oo aad adiga ka mid tahay ayaa eegeysa horumarka ilmaha gaarayo. Waxaa laga yaabaa in howlo siyaado ah loo baahan yahay, goolasha in la bedelo loo baahan yahay ama in imtixaanno siyaado ah loo baahan yahay. Kooxda waxbarashada gaar ahaaneed ayaa go'aamin karta ficillada loo baahan yahay in lagu kaco si ilmahaaga horumar u gaaraan.

Wiilkeyga waxuu leeyahay qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed, laakiin uma baahana in uu helo waxbarasho siyaado ah, waxuu u baahan yahay keliya in meel gaar ah fasalka la fariisiyo. Taasi ma in gool qoran loo yeelaa?

Maya. Haduu wiilkaagu keliya u baahan yahay in uu meel gaar ah fasalka ka fariisto si uu horumar u gaaro, uma baahna in gool lagu qoro qorshahiisa waxbarasho. Waafajin keliya ayuu u baahan yahay si uu guuleysto. Waxaa lagu qorayaa qorshahiisa waxyaabaha uu u baahan yahay in uu dugsiga u fidiyo oo ay ka mid yihiin (waafajin, hab doorin ama dhex dhexaadin).

Tusaalooyin xaqiiqa ah

Maria waa arday dhigata fasalka afaraad. Waxey leedahay dib u dhac xagga waxbarashada ah. Waxaa imtixaanno lagu arkay in Maria akhriin kartaa buugaagta fasalka koowaad heer ah boqolkiiba 20 – 30 kelmadood daqiiqadiiba. Kooxda qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed waxey qoreen gool sanadeed oo ah in Maria akhriskeedu horey u maro.

Gool sanadeedka:

Maria waxey akhriin doontaa qoraallo fasalka labaad heer ah boqolkiiba 60 – 80 kelmadood daqiiqadii iyadoon 2 qaladaad ka badan sameyn.

Haduu Maria qorshaheeda waxbarasho leeyahay hadaf ama ula jeeddo, sidan soo socda ayey u ekaan karaan:

Mrka la gaaro November 15, Maria waxey akhriin doontaa qoraallo fasalka koowaad heer ah boqolkiiba 60 – 80 kelmadood daqiiqadii iyadoon 3 il'aa 5 qaladaad ka badan sameyn.

Mrka la gaaro February 15, Maria waxey akhriin doontaa qoraallo fasalka koowaad heer ah boqolkiiba 80 - 100 kelmadood daqiiqadii iyadoon 2 qaladaad ka badan sameyn.

Mrka la gaaro April 15, Maria waxey akhriin doontaa qoraallo fasalka labaad heer ah boqolkiiba 40 - 60 kelmadood daqiiqadii iyadoon 3 il'aa 5 qaladaad ka badan sameyn.

Mrka la gaaro June 15, Maria waxey akhriin doontaa qoraallo fasalka labaad heer ah boqolkiiba 60 - 80 kelmadood daqiiqadii iyadoon 2 qaladaad ka badan sameyn.

Macalimadda Maria waxey la soconeysaa oo meel ku qoreysaa heerka akhriskeeda maraya iyo qaladaadka ay sameysa sanadka oo idil si loo cabiro horumarka ay gaareysa.

For a look at what the law says:

See the IDEA federal regulations. The regulations are available online at <http://idea.ed.gov>.

They are also available in hard copy at no charge from ED Pubs. Order online at www.edpubs.org or by 1.877.433.7827 Phone, 1.877.576.7734 TTY/TDD, 301.470.1244 Fax

Other resources

The Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers (ALLIANCE)
888.248.0822, www.taalliance.org

The National Dissemination Center for Children with Disabilities (NICHCY)
800.695.0285, www.nichcy.org

Your Local Parent Centers: